



Dariiqa natijjooyinka wanaagsan ee ardaygu waxay ka bilaabataa manhajka

Maamulka cusub ahaan, waxaan ka shaqeynaynay in aanu dejino manhaj dhab ah, dhammeystiran oo loogu talagalay dugsi kasta oo ka jira degmada oo heer kasta leh.

Ujeedadu waa mid sahlan, welina isbedel leh – waa in aad awoodo in aad gasho dugsi kasta oo ka tirsan degmadeena, laga soo bilaabo buuraha galbeed ‘west hills’ ilaa xuduudaha bari, oo aad yeelato fursado isla markaana hesho waxbarasho adag oo si fiican loo qeexay oo casri ah.

Tani waa shaqo socoto, laakiin waxa aan sameynayno waa soo bandhigid fikirka barnaamijka waxbarasho oo ku saleysan heerar kala duwan oo ka jira PPS. Waxaan ugu yeeranaysaa Manhaj La Hubo Oo Shaqeynaya.

Si loo wanaajiyo natijjooyinka isla markaana kor loogu qaado heerarka qalin jabinta ee loogu talagalay dhammaan ardaydeena, waa in aanu yeelanaa waxyaabo muhiim ah oo ay ka kooban tahay waxbarashadu: **Manhaj** bixiya dariiq cad iyo fursad loogu talagalay dhammaan ardayda si ay u guuleystaan; **fursadaha waxbarashooo** loogu talagalay macallimiinta; iyo **qiimeyn**, si aanu ula socon karno waxbarashada ardayda iyo codsiga taageerada si aad u qorsheysan. Dhammaan kuwan waa qayb ka mid ah qaab wax hagaajineed oo joogto ah – waana aasaaska nidaamyada dugsiga oo si weyn u shaqeynaya.

Iyada oo la adeegsanayo ka qayb qaadasho iyo hoggaanka macallimiinta waxaanu bilownay dejinta cutubyo ku salaysan heerar kala duwan oo la baranayo, oo ay weheliyaan casharo tijaabo ah.

Halkan waxaa ku qoran hal tusaale oo ka socda sayniska fasalka lixaad. Sida ku xusan qaybta guud ee Nolosha Sayniska “Life Science: Unugyada iyo Nidaamyada Jirka” waxaanu leenahay cashar tusaale oo cinwaankiisu yahay “Laga soo bilaabo malakuyuulada ‘molecules’ ilaa laga gaarayo noolayaasha; qaababka iyo hababka.” Waxay ugu baaqaysaa ardayda in ay sameeyaan baaritaan, iyaga oo isticmaalaya farsamooyin adag, si ay u caddeeyaani n in waxyaabaha nooli ay ka sameynsan yihiin unugyo.

Arday kasta oo dhigta fasalka lixaad ah oo ka tirsan dugsi kasta waa in aanu ogaanin aasaaska habka biology-gu u shaqeeyo oo kaliya, balse garanayo faahfaahinta hodanka ah ee sida ay noloshu u sameysanto, u korto isla markaana u noqoto mid adag.

Halkana waxaa ku qoran tusaale ka socda manhajka akhriska/qoraalka ee fasalkeena koowaad. “Aqoonso xarfaha iyo weedhaha ku jira gabayada ama sheekooinka soo jeediya waxyaabaha la dareemayo ama dareenku jecel yahay”

Mar labaad, arday kasta oo heerka koowaad ah waa in uu awoodaa in uu bilaabo aqoonsiga waxyaabaha muhiimka ah ee dhanka wax akhriska, oo aanu fahmin kaliya, balse sidoo kale uu ku faraxsan yahay.

Kuwani waa tusaalooyin yar oo ah sida ay shaqadeena hadda socotaa u sii wadi doonto in ay macallimiinteenaa siiso tilmaamo dhanka waxbarashada ah taasi waxay sii wadi doontaa in ay noqoto mid aad loo wanaajiyoo marka waqtii la joogo. Wuxuu badan ka ogaan kartaa [website-kayaga manhajka](#).

Dejinta manhaj cusub waa hal talaabo oo kaliya, waana in ay la socdaan fursadaha horumarinta xirfadeed. Ilaa hadda, waxa aanu qabanay seminaaro maalin kasta la qabanayay oo kala duwanaa oo sagaal maalmood socday kuwaasi oo la qabtay Sibtambar iyo Oktoobar loogu talagalay macallimiinta K-5; waxaanu leenahay seminaar loogu talagalay macallimiinta ESL oo soo socda dabayaqa qada bishan; waxaanan qorsheynay seminaaro loogu talagalay macallimiinta kindergarten oo dhacaya Febraayo iyo Maarsu.

Manhajkayaga shaqo wuxuu sidoo kale ahaa mid diiradda dhewe lagu saarayay kulamada horumarinta xirfadeed ee bilaha ah “Barashada iyo Hoggaaminta Wadajirka ah” ee lala leeyahay maamulayaasha dugsiyadeena.

Tani waa jihada aanu u socono. Weli ma gaarnay halkaasi? Maya, hadda uunbaan bilaabaynaa, laakiin waax kastaa waxay ku shaqeynaysaa gaarista hadafkan. Waan fahamsanahay in nidaamyada dugsiyada dadweynaha ee guuleystaa ay leeyihin manhaj si fiican u qeexan yihiin isla markaana mideysan iyada oo waxbarashada laga hirgeliyo dhammaan dugsiyada degmada.

Dadka fiirada gaarka ah siinaya PPS waxay ogaan doonaan in aanu waqtii badan ka hadleyno waxyaabo ku saabsan waxbirida iyo waxbarashada, muhiimada ay leeyihin wax akhriska/qorista waqtiga hore, waxa waxbarashada dhanka xisaabta ee adag ay u egtahay, iyo sida iyo sida dhammaan waxyaabaha ay ka kooban yihiin looga dhigo kuwo ay heli karaan ardayda kala duwan ee wax bartayaasha ah. Tusaalooyinkani, mawduucyo kale oo badan, sida waxbarashada farshaxanka, sayniska iyo dareenka bulsho ahaaneed waxay udub dhetaad u yihiin wada hadaladeena.

Kani waa dariiqa saxda ee loogu talagalay ardaydeena, degmadeena iyo mustaqbalkeena. Waan ku faraxsanahay in aan bilownay safarkan. Waxay qaadan doontaa wada hadaleena joogto ah si loo xaqiijiyo in dhammaan ardaydeenu ay helaan natijjooyin loo siman yahay.

Guadalupe Guerrero
Kormeeraha guud